



**Soo sheeg ku xadgudubka
Sanctuary Promise.**

 **Khadka Sanctuary Promise:**
1-844-924-7829

 **Saacadaha Khadka:**
Isniinta–Jimcaha
9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo
Fadlan u dhaaf fariin saacadaha
shaqada ka dib. Turjumaad 240+
luqaddood ah. Waan aqbalnaa
wicitaanada Gudbinta oo dhan.

 SanctuaryPromise.Oregon.gov

I iskaan garee.



SanctuaryPromise.Oregon.gov

Qayb baad ka Tahay.

Badbaadada.

Waxaad leedahay xaquuqda in aad badbaado ku sugnaato nolashaada maalin kasta.

Sharaf.

Waxaad tahay qayb ka mid ah bulshadan waxaanad u qalantaa ixtiraam.

Xuquuqda Aadanaha.

Waxaad xaq u leedahay in aad si nabad ah u noolaato oo ku raaxaysato bulshadaada, qoyskaaga, iyo waxyaabaha kugu wareegsan.

Nagu Xidhnow

 @ORcivilrights

 @ORcivilrights

YOU  BELONG.



**Oregon's
Sanctuary
Promise**

**Oregon waa
gurigaaga.**

YOU BELONG.

Soo wac Khadka Sanctuary Promise si aad:

U sameyso Warbixin

Haddii adiga ama qof aad garanayso la beegsaday kaasi oo xadgudub ku ah sharciyada Sanctuary Promise, soo sheeg iyada.

Waxaan

- Bixin karnaa hagitaan qarsoon iyo taageero luqaddaada ah
- Kuu gudbin karnaa ilaha socdaalka
- Furi karnaa baaritaan anaga oo wakiil ah gobolka
- Kaa caawin karnaa taageerada dhaqaale oo degdeg ah
- Kula sameyn karnaa qorshe dhanka badbaadada ah

Weydii su'aalo

Ma hubtid miyaa haddii waxa dhacay uu yahay ku xadgudbayo xeerka magangelyada?

Na soo wac waanan ku hagi karnaa.

Waa maxay Oregon's Sanctuary Promise?

Marka la joogo Oregon, dowladda gobolka iyo degaanka, oo ay ku jiraan booliska, looma oggola in ay fuliyaan sharciga socdaalka ee federaalka marka laga reebo in ay haystaan amar maxkamadeed oo uu saxeexay garsoore.

Goorma ayaa la soo sheegayaa xadgudubka Sanctuary Promise?

- Haddii uu booliisku su'aal kaa waydiiyo dalka aad ka soo jeedo ama xaaladaada muhaajirnimo.
- Haddii aad aragto dowladda gobolka iyo degaanka ama boolis la shaqeynaya mas'uuliyiinta socdaalka ee federaalka.
- Haddii aad aragto boolis la shaqeynaya ICE si la iskugu duwo joogsiga taraafikada.
- Haddii shakhsiyaad ku jira jeel ama dhaqan celin 'probation' loo diiday adeegyo, gargaaro, ama faa'iidooyin ku saleysan xuquuqdooda muhaarjirnimo.
- Haddii lagugu xiro maxkamad dhexdeeda ama inta aad u kala safrayso maxkamad, iyada oo aan la haysan amar maxkamadeed oo uu saxeexay garsoore.
- Ma hubtid miyaa? Na soo wac.

Aragtideena

Oregon waa meel ammaan ah, halkaasi oo dadka oo dhan la soo dhaweynayo, oo ay ku jiraan, in ay yeeshaan fursad loo wada siman yahay si looga xoroobo nacayb iyo takoorid, iyo halkaasi oo hay'adeenu ay taageeraan oo ay ka jawaabaan baahiyaha dadka.

Oregon waa gobolkii ugu horreeyay dalka ee aasaasa sharciyada magangelyada sanadkii 1987